

Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka

– macluumaad mas’uuliyiinta loogu talagalay ee ku saabsan waxbarasho-horaadka

Ilmahaagu waxaa uu deyrta dambe bilaabayaa waxbarasho-horaadka! Waxbarashada waxaa wax looga bartaa iyadoo loo sii marayo ciyaar iyo wadajir wax u baaritaan, waxaa lagu bartaa aqoonta saaxiibtinimada ee fiican waxaana sidoo kale la xoojiyaa isku kalsoonaanta cunugga.

Waxaan cunuggaada u soo diraynaa boos waxbarasho-horaad, kaas oo ku yaal nawaaxiga ardayga qaadashada waxbarasho-horaadka ee waafaqsan cinwaanka guriga. Waalidka ayaa kala dooran kara in uu booska aqbalayo iyo in uu boos kale codsanayo. Waxbarasho-horaadka waxaa lagu qabanqaabin karaa qolalka xannaano-maalmeedka ama dugsiga. Waxaa laga yaabaa in hal nawaaxiga qaadashada ardayga ee waxbarasho-horaadka ay ku yaalaan hal ama dhowr goobood oo qabanqaabiya waxbarasho-horaadka. Waxaa sidoo kale isla nawaaxiga ku aali kara dhowr dugsi. Booska waxbarasho-horaadka waxaa lagu salaynayaa qaab waafaqsan cinwaanka guriga ee cunuggaadu deganaa Janaayo 2022.

Luqad ku harqinta, daryeelka xilliyeed, baahida taageerada cunugga ama ka qaybqaadashada tijaabada waxbarasho-horaadka labada sano ah darteed, waxay goobta waxbarasho-horaadku noqon kartaa mid ku taal meel aan waafaqsanayn cinwaanka guriga ee ee nawaaxiga qaadashada ardayga waxbarasho-horaadka. Goobaha waxbarasho-horaadka ee waafaqsan cinwaanka gurigaada waxaa laga hubin karaa cinwaanka **palvelukartta.hel.fi**. Nawaaxiyada arday qaadashada ee waxbarasho-horaadka waxaa laga helaa **hel.fi/esiopetus**.

Waxbarasho-horaadka waxaa laga qaybqaataa sannad kahor billaabashada waajibka waxbarashada. Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadood maalintii inta lagu jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Waxbarasho-horaadku waxay Agoosto 2022 billaabanaaysaa **11.8.2022**. Barbaarin-horaadka waxaa si waafaqsan baahida qoyska loogu qabanqaabinayaa isla goobta waxbarasho-horaadka iyadoo dhammaystiraysa waxbarasho-horaadka. Looma baahna in si gaar ah loo codsado barbarian-horaadka.



Helsinki

Guddoomista ama codsashada goobta waxbarasho-horaadka

Adigoo ka mas'uul ah cunugga ku jiro barbaari-horaadka degmada, waxaad goobta barbaarin-horaadka ku qaadanaysaa muddada u dhexeysa **1.-13.3.2022** adeegga dan-qabsashada ee Asti.

Haddii aadan qaadan booska waxbarasho-horaadka ee cunugga la siiyay, boosku wuxuu u bannaanaanayaa codsade kale waana in aad boos kale codsato. Waxbarasho-horaadka waxaa wakhtiga u dhexeeya **1.-15.3.2022** laga codsanayaa arrimo fullinta elgtroonigga ah ee Helsinki. asiointi.hel.fi.

Waxbarasho-horaadka ku baxda afka finnishka iyo iswiidhishka waxaa magaalada Helsinki looga qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Waxbarasho-horaadka xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay waxaa si toos ah looga codsanayaa xannaanada la doonayo. Xannaano-maalmeedyada gaarka loo leeyahay ee bixiya waxbarasho-horaadka waxaa laga helaa cinwaanka hel.fi/esiopetus.

Waxbarasho-horaadka cunugga ka qaybqaadanaya waxbarasho-horaadka tijaabada ah ee labada sano soconaysa waxay ka sii soconaysaa goobta uu hadda ku jiro ee waxbarasho-horaadkalabada sano ah. Waalidka cunugga ku jira kooxda luqad ku harqinta barbaarin-horaadka wuxuu goobta waxbarasho-horaadka ee luqad ku harqinta toos uga qaadanayaa xannaanada. Haddii aad cunuggaada u doonayso daryeel xilliyeed, waa in aad diidaa booska waxbarasho-horaadka ee lagu soo diray kaddibna aad dan-qabsashada elektroonigga ah ku dalbataa xannaano-maalmeedka leh daryeel xilliyeedka ee qabanqaabiyay waxbarasho-horaad.

Cunuggu wuxuu xaq u leeyahay boos waxbarasho-horaad oo ku yaal nawaaxiga arday qaadashada ee waxbarasho-horaadka. U wareegista soona kale ama goob kale ee waxqabad waa suurtagal, haddii ay halkaas ka bannaan yihiin boosas waxbarasho-horaad.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaad ka heleysaan bogagga shabakadda Helsinki ee hel.fi/esiopetus

Ku soo dhowow dugsi-horaadka!

Sisäänkirjautuminen (Gelista gudaha)

Ku fur borowsarka kambuyuutarkaada, tableetigaada ama telefoonkaada casriga ah.

- ▶ U wareeg cinwaanka asti.hel.fi
- ▶ Ka dooro luqadda waxqabadka ee doonayso dhinac kore ee midig ee bogga
- ▶ Riix badhanka **Kirjautu sisään (Gal gudaha)**
- ▶ Muuji aqoonsigaada adigoo isticmaalaya habka aqoonsi ee dooratay
- ▶ Dooro **Jatka (Sii wad)**
- ▶ Dooro **Jatka palveluun (Sii wad adeegga)**
- ▶ Hubi macluumaadkaada kaddib horay u sii soco

Esiopetuspaikan vastaanottaminen (Guddoomista goobta waxbarasho-horaadka)

Barta cunugga ayaad ku arkaysaa wargelin ku saabsan guddoomista booska waxbarasho-horaadka, marka ay isdiiwaangelintu socoto. Riix badhanka **"Hyväksy / hylkää" ("Aqbal / diid")**

1. Dooro **"Kyllä, otan osoitetun paikan vastaan" ama "Ei, en ota osoitettua paikkaa vastaan" ("Haa, waa qaadanayaa booska naloo tilmaamay" ama "Maya, ma qaabanayo booska naloo tilmaamay")**
2. Riix **"Jatka seuraavaan" ("Sii wad kan xiga")**
3. Hubi macluumaadka kaddibma riix **"Lähetä" ("Dir")**



hel.fi/esiopetus
#HelsinkiOppii